

# Sharciga Gobolka iyo Xeerrarka Maamulka Minnesota ee Hadda

## Xeerrarka Maamulka Minnesota ee u-qalanka IEP:

- Minnesota Administrative Rule 3525.1341: Xeerran wuxuu raacayaa sharciga federaalka ee IDEA, wuxuuna qeexayaa shuruudaha u-qalanka Naafonimada Waxbarashada Gaarka ah (Specific Learning Disability). Ilmuhu wuxuu u qalmi karaa laba siyaabood: (1) Haddii darajadiisu hoos uga dhacdo celceliska 1.75 leexasho caadi ah; ama (2) Haddii horumarkiisu yahay mid aan ku filnayn. Ilmuhu waa inuu buuxiyaa shuruudaha ku xusan Qodobka 2, A, B, C, iyo D.
- Minnesota Administrative Rule 3525.1354: “Ka-reebidda Kooxda ee Go’aanka U-qalanka”: Kooxdu waxay go’aamin kartaa in ardaygu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira haddii uu leeyahay naafo u baahan waxbarasho gaar ah, xitaa haddii uusan buuxin dhammaan shuruudaha gaarka ah ee ku xusan qaybo ka mid ah 3525.1325 ilaa 3525.1345 iyo 3525.2335.
- Cutubka 3525 – Carruurta Naafada ah: “Naafonimada waxbarashada gaarka ah” waxaa loola jeedaa cilad ku timaadda hal ama dhowr hab-fikir oo maskaxeed oo aasaasi ah kuwaas oo ku lug leh fahamka ama adeegsiga luuqadda (hadal ama qoraal), taasoo ka muuqan karta awood-darro ku timaadda dhageysiga, fikirka, hadalka, akhriska, qorista, higgsaadda, ama xisaabinta; waxaana ka mid ah xaalado sida dhibaatooyinka aragga ee garashada, dhaawaca maskaxda, shaqo-xumo maskaxeed oo fudud, disleksiya (dyslexia), iyo aphasia horumarineed.

## Sharciga Gobolka Minnesota (MN Statutes):

- 125A.01 Waxay qeexaysaa disleksiya (dyslexia).
- 120B.12 Sharciga READ Act: Yoolka akhriska iyo faragelinta. Ujeeddadu waa in dhammaan carruurta Minnesota ay akhriyaan heerka fasalka ama ka sarreeya sanad kasta, laga bilaabo kindergarten.
- 120B.123 Hirgelinta READ Act: Barnaamijyo iyo taageero ay oggolaatay Waaxda Waxbarashada Minnesota (MDE).
- 125A.56, Subd. 1 Waxbarid kale oo la siinayo ilmuhu haddii uusan akhrin heerka fasalka.
- 122A.092 Tababarka macallimiinta ee dyslexia iyo akhriska ku salaysan caddayn.
- 120B.122 Khabiirka Disleksiya ee Waaxda Waxbarashada Minnesota.
- 120A Xeerka Waxbarashada Minnesota
- 120A.03 Qoraalka Himilada Waaxda Waxbarashada Minnesota.

---

Wixii macluumaad dheeraad ah booqo <https://www.decodingdyslexiamn.org/mn-rules-statues>

Macluumaadka la bixiyay maaha, oo aan loogu talagalay, ka dhigan talo sharci. Dhammaan macluumaadka, waxa ku jira, iyo agabka, oo ay ku jiraan cid saddexaad, ayaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad guud oo keliya. Waa inaad la xiriirtaa qareenkaaga si aad talo uga hesho arrin kasta oo sharci ah.

